**Card #______________________ Program Year 2023**
*(For official use only)*

## Codsiga Barnaamijka Nafaqada Suuqa Beeraleyda ee Waayeellada iyo Dhaarta Qoraalka ah ee Xaq-u-yeelashada ee WA

***Magaca: ___________________________________________**

***Taariikhaha dhalashada (bisha/maalinta/sannadka): _______________________**

**Cinwaanka: ______________________________ Lambarka Abaarmenka: _____________**

**Magaalada: _________________ *Summada Degaanka: _________ Degmada: _________**

**Telefoonka: _________________________**

**Barnaamijka Nafaqada Suuqa Beeraleyda ee Waayeellada (SFMNP) ayaa wuxuu dadka waayeellada ah ee uu dakhligooda hooseeya siiyaa khudaar iyo miro markaasi la soo gurey (darey ah) iyada oo uu yoolku yahay sii wanaajinta xaaladda caafimaadkooda iyo nafaqada. Wuxuu kaloo taageeraa beerashada degaanka iyadoo la kordhinayo isticmaalka suuqyada beeraleyda iyo miisaska wadadda dhinaceeda la dhigto.**

**Si aad xaq ugu yeelato barnaamijka SFMNP, waa in aad ka soo baxdaa dhammaan shuruudahan soo socda:**

**Waa in aad tahay 60 sano jir ama ka weyn (ama 55+ haddi aad tahay Mareykan Asal ah/Alaskan Asal ah)**

**Dhakhligaaga waa in uu ka hooseeyaa 185% ee Heerka Saboolnimada Federaalka. Taasi macnaheedu waa:**

- **$26,973 Dakhliga Sannadlaha ama $2,248 Billaha ah ee loogu talagalay 1 qof**
- **$36,482 Dakhliga Sannadlaha ama $3,040 Billaha ah ee loogu talagalay 2 qof**
- **Qoysaska waaweyn, kuddar $792 oo loogu talagalay qof kasta oo dheeraad ah**

**Waa in aad tahay qof deggan Gobolka Washington**

**Marka aad saxiixdo foomkan, waxaad caddeynaysaa in aad ka soo baxdo <u>dhammaan</u> shuruudaha xaq u yeelashada ee kor ku xusan waxaadna qiraysaa in lagu siiyey macluumaadka Xuquuqaha iyo Mas'uuliyadaha.**

*_____________________________ *_______________

Saxiixa Ka-qaybgalaha Taariikhda

Fadlan ka jawaab <u>labada</u> su'aalood ee hoos ku xusan:

1. Miyaad isu aragtaa in aad tahay Hisbaanik/Laatiin? ☐ Haa ☐ Maya
2. *Fadlan calaamadee dhammaan kuwa ku habboon: ☐ Hinddida Mareykanka ama Alaskaan Asal ah ☐ Aasiyaan ☐ Afrikaan Ameerikan ☐ Caddaan ☐ Hawaayaan Asal ah ama Dadka Kale ee Ka-soo-jeeda Jasiiradaha Baasifigga

Si waafaqsan sharciga Federaalka iyo siyaasadda Waaxda Beeraha ee Mareykanka, hay'addan waxaa ka mamnuuc ah in ay sameyso takoor ku saleysan isir, midab, asal ahaan qofka meesha uu ka soo jeedo, jinsiga, da'da, naafonimo ama aargoosiga dhaqdhaqaaqa xuquuqaha madaniga hore ee barnaamij kasta ama

waxqabad kasta oo ay sameyso ama ay maalgeliso hay'adda USDA. Fadlan macluumaad dheeraad ah ka eeg dhinaca kale ee dhaarta qoraalka ah.

### Takoor la'aan

### Ka xoroobidda takoorka

Hay'addan waxaa ka mamnuuc ah takoor ku saleysan jinsiga, isirka, caqiidada, diinta, midabka, qof asal ahaan meesha uu ka soo jeedo, da'da, halyeynimada ama xaaladda militeri, dookha galmo, naafonimo, ama isticmaal eyga dadka haga ama xayawaanka adeegga ee tababaran (xayawaanka adeegga waa xayawaan shakhsi ahaan loo tababarey in uu shaqo qabto ama hawlo fuliyo iyada oo uu u adeegayo shakhsiga naafada ah). (RCW 49.60.030)

### Bayaanka Takoor La'aanta ee USDA

Iyadoo la raacayo sharciya xuquuqaha madaniga ah ee Federaalka iyo siyaasadaha iyo xeer-nidaamyadan Waaxda Beeraha ee Mareykanka (USDA), USDA, Wakaaladaheeda, xafiisyadeeda, iyo shaqaalaheeda, iyo hay'adaha ka qaybgalaya ama maamulaya barnaamijyada USDA waxaa laga mamnuucey in sameeyaan takoor ku saleysan isirka, midabka, qof asal ahaan meesha uu ka soo jeedo, jinsiga, naafonimada, da'da, ama aargoosi loogu talagalay xuquuqaha madaniga ee hore ee barnaamij kasta ama waxqabad kasta oo ay sameyso ama ay maalgeliso hay'adda USDA.

Shakhsiyaadka naafada ah ee u baahan habab war-isgaarsiineed kale oo loogu talagalay macluumaadka barnaamijka (tusaale ahaan, farta indhoolayaasha ee Bariil, far waaweyn, cajalad, Luuqadda Dhegoolayaasha ee Mareykanka, iwm.), waa in ay la xiriiraan Hay'adda (Gobolka ama degaanka) ee halka ay dheefaha ka codsadeen. Dadka dhagoolaha ah, maqalka ku adag ama leh naafonimo hadal waxaa ay USDA kala xiriiri karaan Adeegga War-lalinta Federaalka (800) 877-8339. Intaa waxaa dheer, in macluumaadka barnaamijka lagu heli karo luuqado kale oo aan Af-Ingiriis ahayn.

Si aad u soo gudbiso cabashada takoorka ee barnaamijka, buuxi Foomka Cabashada Takoorka ee Barnaamijka USDA, (AD-3027) ee laga heli karo barta internet-ka ee: https://www.usda.gov/oascr/how-to-file-a-program-discrimination-complaint,, iyo xafiis kasta ee ay leedahay USDA, ama qor warqad ku socota USDA ka-dibna warqadda ku sheeg dhammaan macluumaadka lagu codsadey foomka. Si aad u codsato nuqulka foomka cabashada, wac (866) 632-9992. U gudbi foomkaaga la buuxiyay ama warqadda ku socota USDA:

(1) boostada: U.S. Department of Agriculture
Office of the Assistant Secretary for Civil Rights
1400 Independence Avenue, SW
Washington, D.C. 20250-9410;

**OGOW: BOOSTADA HA UGU DIRIN Codsiga SFMNP cinwaankan**

(2) fakis: (202) 690-7442; ama

(3) email: program.intake@usda.gov.

***Hay'adan waxaa ay bixisaa fursad loo siman yahay.***